



Gole Gorfayn Dib u Dhaca Kobaca Dhallaanka iyo Xaaladda Agnaanka (Autism) iyo Shacabka Soomaaliyeed

Maalin: Sabti, 15-ka Nofambar, 2008

Waqti: 10 aroornimo – 4:15 galabnimo

Goob: Wilder Elementary School

Laura Ingalls Auditorium

3345 Chicago Avenue

Minneapolis, MN 55419

Hadaf:

Hadafka ugu mudan ee goluhu waa wacyi galin shacabka Soomaaliyeed oo laga jahli bixiyo dib u dhaca kobaca dhallaanka iyada oo xooga la saarayo xaaladka Agnaanka ama Autism iyo in la booriyo shacabka.

Goluhu waa fagaare loo diyaariyey in loogu soo bandhigo waalidiinta iyo xirfadleydaba macluumaad dhab ah iyo xoggo ku saabsan waxa ay tahay runta Agnaanimadu ama Autism-ku, calaamadaha lagu garto, sida loo baaro, sida loo daweeyo ama baxnaaniyo iyo adeegyada loo fidiyo ilmaha. Ugu dambayna loo soo bandhigo qiimaha weyn ee caawinta hore ee ilmaha kobociisu dib udhaco iyo waalidka oo lagu xiriiriyo hay'adaha iyo adeegyada bulsho bixiyaasha.

Yaa loogu talagalay golaha?

Waalidiinta iyo bulshada Soomaaliyeed

Dhakhtarada, iyo madaxda bulsheed

Maareeyayaasha iyo barayaasha

Hey'adaha adeegyada bixiya

Xirfadleyda ku takhasustay caafimaadka bulshada iyo Xiska aadamiga

Hay'adaha Kafiilka ka ah

Minnesota Departments of Health, Education, iyo Human Services, Fraser, HEAL Institute, , Minneapolis and St. Paul Public Schools, PACER, Confederation of Somali Community of Minnesota (CSCM), Autism Society of Minnesota, Center for Inclusive Childcare, ARC of Greater Twin Cities, [iyo kuwa kale.](#)

Jadwal Barnaamijeed

Waqti	Qaybo
9:30 – 10:00	Diiwaangalin
10:00 – 10:30	<p>Furitaan barnaamijeed: Weedh soo dhawayneed</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Qur’aan iyo soo dhaweyn <ul style="list-style-type: none"> ○ Goobjooge: Bulshoweynta Soomaaliyeed oo ay ku jiraan waalidiinta dhalay dhallaanka Agnaanta qaba, xirfadleyda iyo u adeegayaasha bulsheed. <p>Weedho furintaan:</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ MDH commissioner - Wisiir goboleedka Minnesota, Dr. Sanne Magnan ▪ Imam ▪ Hogaamiye bulsheed – Saeed Fahia
10:30 – 12:00	<p>Xilqada 1-aad: Waa maxay Agnaanku (Autism)? Maxaa ka dhacaya MN-ta, Maxaynuse ka ognahay?</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Gorfayn dib u dhac koboc dhallaameed ▪ Ka hortaga goorta hore (early prevention) ▪ Dulmar kooban oo ku saabsan Agnaanka (Autism) ▪ Baaritaanka hore: Xaq u yeelasho waxbarasho iyo baaritaan caafimaad ▪ Daaweyn, maarayn iyo ka hortag ▪ Diraasad cilmiyeed dhacdada xalaadda agnaanka. Incidence Study <p>Duluc: Dulmar dib u dhac koboc dhallaameedka iyo Agnaanka, muhimadda baadhitaanka iyo garawsiga goorta hore, xaq u yeelashada waxbarasha gaar ahaaneed, baadhitaanka dhakhtareed, bandhiga dirasad cilmiyeedka ina tusaysa cadadka xaaladan iyo sida MN-ta wax uga jiraan. Waxa lagu garto xaaladan iyo baahida dhallaanka qaba ee dareen iyo dhaqan.</p>
12:00 – 1:00	Salaad Duhur iy Qado
1:00 – 2:00	<p>Xilqada 2-aad: Xal u helidda eed saar ??? (addressing stigma)</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Agnaanimu (Autism) wadankii hooyo iyo United States ▪ Maxay tahay Agnaanimadu, maxaanaynse ahayn ▪ Diraasad cilmiyeedka la xidhiidh tallaalada iyo Agnaanimada ▪ Gabayga HIIL NAAFO <p>Duluc: Ma aha dhacdo cusub, ma aha dhacdo Soomaalida u gaar ah; ahmiyadda tallaalada, waalidku ma aanay samayn wax qalad ah ama lagu canaanto.</p>
2:00 – 2:30	Salaad Casar iyo war is weydaarsi (networking)
2:30 – 3:30	<p>Xilqada 3-aad: Faham hay’adeed (Navigating the System)</p> <ul style="list-style-type: none"> ▪ Sida loo helo adeegyada bulsho ee degmeed (county) ▪ Sida loo helo adeegyada bulsheed ee iskuulaadka ▪ Iskuulaadka degmeed (School district) – Noocyada adeeg ▪ MDH, DHS, MDE– Is-kaashi hay’adeed ee kaalmada hore ee dhallaanka ▪ AuSM – Taxane Sahan (Discovery Series) <p>Duluc: Adeegyadee ayaa diyaar kuu ah, side ku heli kartaa, xiriiro iyo taleefanno. <i>What is available, how to access services, resources, contacts and phone numbers. Explanation of how state agencies depend on community partners to provide supports and services. Let them know that agencies work together.</i></p>
3:30-4:15pm	<p>Xilqada 4-aad: Waalidiinta, Tan igta iyo Weedho Gunaanad ah</p> <p>Duluc: Dhegaysi aaraa’ada waalidiinta Soomaaliyeed, gabogabo iyo guubabin. Talaabooyinka laqaadi karo mustaqbalka iyo gabogaynta barnaamijka.</p>

**Gole Gorfayn Dib u Dhaca Koboca Dhallaanka iyo Xaaladda Agnaanka - Autism
iyo Shacabka Soomaaliyeed
Diiwaan Galin
Sabti, Nofembar 15th, 2008**

Boosaska oo xadidan, iyo anaga oo doonayna in aan ku xisaabtano cuntada iyo adeegayda kale ee ay u baahan karaan goobjoogayaashu, fadlan is diiwaangali, soona celi arjiga 10-ka bisha Nofembar, 2008. Qofkii doonayaa, waa uu is diiwaan gelin karaa isaga oo adeegsanaya taleefan, fax, Email, ama qofka iska xaadiriya xarunta Confederation of Somali Community of Minnesota.

ta waxaa lagu iyada oo golahu loogu tala galay dad cadadkooku go'an yahay iyo si aan u diyaarino cunto, daryeel dhallaan, iyo waxtaro kale oo ku fillan dhammaan dadka ka soo qayb galaya. Fadllan buuxi arjigan diwaangalinta oo soo celi ugu dambayn bisha Nofembar 10 keeda, 2008. Waxaad isku diiwaan galinkartaa idiga oo macluumaadka hoos ku sugan ku dhaafa tilifoonka hoos ku qoran, adiga oo soo dira email, fax ama bostada soo dhiga. Waxaad kale ood ku dhaafi kartaa arjigangan xafiisa Saciid Faahiye ee Confederation of Somali Community of Minnesota.

Fadlan qor:

Magac: _____
(Fadlan u qor si waafi ah)

Taleefan Guri _____ **Taleefan Shaqo** _____

Cinwaan _____

Magaalo _____ **DG** _____ **ZIP** _____

E-MAIL _____

___ **Waalid** ___ **Xirfadle,** **Xirfad :** _____

Hay'ad: _____

Waalidiin:

Fadlan ka jawaab su'aalahan si aan kuu marti galino, kuuguna diyaarino waxa aad u baahan tihii idinka iyo qoysaskiina.

Ma u baahan tahay gaadiid malintaa? ___ Haa ___ Maya ___ Imisa qof

Ma u baahan tahay daryeel dhallaan? ___ Haa ___ Maya ___ Imisa caruur
Da'da caruurta: _____

Ma jiraan carruur u baahan daryeel gaar ah? ___ Haa ___ Maya ___ Imisa

Si aad u xejisatid kursigaaga, fadlan buuxi arjigan, una soo celi:

Chris Bentley
Fraser,
2400 West 64th Street,
Minneapolis, MN 55423
Ama u soo dir (fax) 612-861-6050
Ama Email chris@fraser.org

*Haddii aad rabtid in aan taleefan isku diiwaan galisid, fadlan la hadaly 612-798-8359, oo ku dhaaf magacaaga, cinwaankaaga, taleefankaaga, haddii aad u baahan tahay gaadiid ama daryeel dhalaan inta aad joogtid golaha iyo tirada carruurta iyo baahidooda.

*Arjigan waxa laga heli karaa xafiiska Confederation of Somali Community of Minnesota, xarunta Brian Coyle, haddii aad doonayso in aad qof ahaan buuxiso arjiga, kuna dhaaf xafiiska Soomaalida.

Note: © Pictures are provided by Huda Farah